## Soomaaliya: Ka go'an dib u soo celinta kaabiyaasha Nolosha

Sanad ka dib abaartii ba'neyd ee ku habsatay dalka Soomaaliya, Maxamed Sheekh Cali oo ah isu duwaha mashaariicda sugnaanta dhaqaale ee ICRC-da ee dalka ayaa wuxuu sharaxaad ka bixinayaa xaaladaha nafaqo iyo asalka waxyaabaha sababa nafaqodarada. Wuxuu ka hadlayaa sida ICRC-da ay ugu jawaab bixineysay baahida deg deg ah iyo kuwa fogba

### Sidee u sharaxi laheyd xaalada nafaqo ee maanta, sanad ka dib abaartii darnayd?

Nasiib wanaag, xaalad nafaqo ee Soomaaliya way soo hagaagtay tan iyo markii abaartu ay gaartay meeshii ugu xumeyd bishii July ee lasoo dhaafay. Hase ahaatee, inkastoo dadaal badan ay sameeyeen hayadaha gargaarka, dad badan ayaa weli waxay wajahayaan dhibaatooyn badan. ICRC-da waxay taageertaa 27 xarumood oo quudin ah iyo 12 xarumo caafimaad oo wareega, kuwaasoo ay maamusho Ururka Bisha Case e Soomaaliyeed koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya, halkaasoo 210,000 caruur ah oo ay nafaqo daro hayso iyo 33,000 hooyooyinka nuujiya lagu daweeyay tan iyo Janaayo 2011. Inkastoo bilihii dhowaa dadka imanaya goobaha quudinta ay hoos ugu dhacday sidii ay ahayd bilowgii abaarta, hadana tirada soo kordheysa ee dadka la daweeyay ee ku soo noqonaya xarumaha waxay muujinaysaa inay xaaladu weli tahay mid halis ah. Walaaca ugu wayn wuxuu ka jiraa qeybaha Koonfureed ee Soomaaliya halkaasoo xaalado amaan darri ay sababeen hoos u dhac xagga daweynta ah iyo gaaridda xarumaha caafimaadka.

### Maxay ICRC-du sameysaa si ay ugu gargaarto dadka tabaalaysan ee Soomaaliya?

Dadka ugu taabaleysan waa kuwa ay saameeyeen dagaalada socda iyo masiibooyinka dabiiciga ah – gaar ahaan barakayaasha, beeraleyda, xoolo dhaqatada iyo qeybo ka mid ah bulshooyinka dulman. ICRC-da waxay u caawisaa siyaabooyin kala duwan oo midkiiba ka jawaab bixinaya baahiyo cayiman. Xaaladaha qatarta ah, waxaan bixinaa samafal inagoo isla markaana u diyaar garoobayna caawinta dadka si ay dib ugu habeeyaan noloshooda inagoo qaybinayna agab iyo abuur, sare u qaadaya kaabayaasha beeraha iyo inagoo bilaabayna mashariic yar yar oo xagga dhaqaalaha ah.

### Waa Maxay Caqabadaha aad kala kulantaan u gargaarida dadka?

Caqabada ugu wayn waa gaaritaanka meelaha ay dhibaatadu a jirto. Aad ayay u adkayd inaan gaarno meelaha qaar halkaaso ay joogaan dad u baahan gargaarkeena, ma ahan oo kaliya xaaladaha amaan awgood ee waxaa kaloo jira arrimo la xiriira saadka. Roobabkii waaweynaa ee ka da'ay gobollada Mudug iyo Galgadud, tusaale ahaan, waxay aad u adkeeyeen gawaarida inay isticmaalaan wadooyinka oo ahaa kuwo xaaladoodu xun tahay. Dhibaatada noocaas ah inta badan waxay hakiyaan shaqadeena.

Dhinaca kale, waxaan ka faa'idnaa taakulada xoogan ee beelaha. Beelaha deegaanka waxay nagu caawiyaan inaan qaybino gargaarka deg dega loogu baahan yahay.

Xaqiiqda ah in xaalada Soomaaliya ay si joogta ah isu bedesho ayaa adkeynaysa qorshe dejinta. Laakiin, waxaan ku maareynaa dabacsanaan aan ka muujino howlaheena sidaa darteed si sahlan ayaa loo qaban karaa.

**Waa maxay rajooyinka bilaha soo socda?**

Colaad, xaalado qalafsan ee cimilada oo dabadheeraadey iyo adeega bulshada oo aan jirin oo isbiirsaday ayaa waxay sababeen heerar aad ugu hooseeya wax soosaarka xagga beeraha ah ee dalka. Colaada awgeed iyo gaarid la'aanta suuqyada waaweyn, qiimaha waxa yar ee ay soo saareen beeralayda wuxuu ahaanayaa mid qiimihiisu hooseeya. Inkastoo roobabkii ka da'ay waqooyiga iyo bartamaha Soomaaliya ay ahaayeen heerkii la rabay amaba ka sareeyay, xiliga Gu'ga ee Maarso ilaa Juun wuxuu u muuqdaa inuu dhicisoobay meelo badan oo ka mid ah koonfurta Soomaaliya oo ah meesha ugu wax soo saarka badan xagga cuntada. Nasiib darro, sugnaanta la'aanta cuntada ee meelahan ay saameeyeen dagaalada iyo abaarta waxaa laga yaabaa inay ku sii jirto heer qalalaase.

**Malaga yaabaa inaad la kulantaan caqabaddo kale?**

Dagaalka socda wuxuu sababay xirnaashaha wadooyinka ee meelaha cuntada laga soo saaro ee miyiga ah iyo suuqyada, inay kororto tirade dadka barakacaya iyo inay beeraleyda ka cararaan dhulkooda. Wuxuu kaloo xanibay dhaqdhaqaaqa xoolo dhaqatada, isagoo ku adkeeyey inay gaaraan goobaha daaqa ee xoolahooda.

Arimahan soo kordhay waxay yareeyeen awooda dadka ay siku maareeyaan taasoo markii horeba liidatay. Taasi ah waalaaca ugu weyn ee ICRC-da bilaha iyo isbuucyada soo socda.